



# Social Security (Amniga Sooshalka) Lambarada kuwa aan Muwaadiniinta ahayn

## Miiska ku jira

Qofka aan muwaadinka ahayn ma u baahan yahay Social Security (Amniga Sooshalka) lambarada (SSN, xarfaha soo gaabsan oo Ingiriisi ah)?	1
Sideed ku heli karaa SSN iyo kaadhka?	2
Maxaan u baahanahay inaan u soo gudbiyo Social Security (Amniga Sooshalka) xafiiska?	2
Goormaan codosanayaa?	3
Imisa ayay codsashada kaadhka SSN kharashkeedu yahay?	3
Bal ka waran haddii aan u baahdo SSN wixii ah sababaha aan ahayn shaqada?	4
Ma u baahan tahay ujeedooyinka cashuurta?	4
Inaad nala soo Xiriirtid	5

## Qofka aan muwaadinka ahayn ma u baahan yahay Social Security (Amniga Sooshalka) lambarada (SSN, xarfaha soo gaabsan oo Ingiriisi ah)?

Iyaddoo aad tahay qof aan muwaadin ahayn si aad uga shaqayso Maraykanka mooyaane, suuragal ahaan uma baahnid SSN.

Guud ahaan, keliya kuwa aan muwaadiniinta ahayn ee loo oggolaaday inay ka shaqeeyaan Maraykanka Department of Homeland Security (Wasaarada Amniga Gudaha Wadanka) (DHS, erayo soo gaabsan oo Ingiriisi ah) ayaa heli kara SSN. SSN waxaa loo isticmaalaa in laga warbixiyo mushaharka qofka dowladda oo waxaa la

go'aamiyaa u qalmida qofka Social Security (Amniga Sooshalka) dheefaha. Waxaad u baahan tahay SSN si aad u shaqayso, ururiso Social Security (Amniga Sooshalka) benefits, and receive other government services.

Kuwa aan muwaadiniinta ahayn ee sharci ahaan la oggolaaday waxay dheefo iyo adeegyo heli karaan iyagoon lahayn SSN. Uma baahnid SSNsi aad u hesho ruqsada wadista, si aad dugsi isugu diiwaan geliso, aad ku hesho caymiska gaarka ah ee caafimaadka, ama ku codsato barnaamijyada qadada dugsiga ama guryaha la kaabo.

Ururada qaarkood waxay isticmaalaan SSNsi ay adiga kuugu aqoonsadaan diiwaanada. Badanka, si kastaba ha ahaatee, way ku aqoonsadn doonaa qayb qaababka kale ah haddii aad codsato.

Uma magacaabi karno SSN keliya si aad u hesho ruqsada wadaha ama aad u hesho adeega u baahan hubin qadarinta.

In kato shirkado badan, sida bangigada iyo shirkadha daynta, ay ku waydiin karaan SSN guud ahaan lagaagama baahna inaad bixiso mid haddii aanad mid lahayn.

## Sideed ku heli karaa SSN iyo kaadhka?

Haddii aad tahay muhaajir, waxaad u codsan kartaa labba qaab:

- Waxaad ka codsan kartaa wadaka aad u dhalatay ka hot inta aanad iman Maraykanka marka aad soo xaraynayso fiisaha muhaajirka U.S. Department of State (U.S. Waaxda Gobolka). Badanka xaaladaha, haddii aad codsato SSN iyo kaadhka wata codsiga fiisaha muhaajirka, waa inaanad booqan Social Security (Amniga Sooshalka) xafiiska Gudaha Maraykanka. Macluumaadka dheeraadka ah, arag [www.ssa.gov/ssnvisa](http://www.ssa.gov/ssnvisa), keliya lagu heli karo Ingiriisi).
- Haddii aad sharci ku joogto Maraykanka, waa inaad la xidhiidha Social Security maxaliga ah (Amniga Sooshalka) office. Arag hoos waxa aad u baahan tahay inaad u gudbiso Social Security (Amniga Sooshalka) office.

Haddii aanad muhaajir ahayn, waxaa jira labba qaab oo aad ku codsan karto oo ku xidhan heerkaaga fiisaha:

- Haddii si sharci ah loo soo bandhigo gudaha Maraykanka iyo codsiga oggolaanshaha shaqada ama heerka degenaanshaha joogtada ah ee DHS, U.S. Citizenship and Immigration Services (Muwaadininada Maraykanka iyo Adeegyada Socdaalka) (USCIS, xarfaha soo gaabsan oo Ingiriisi ah), waxaad codsan karta SSN ama beddelka kaadhka. Tan waxaa lagu samayn karaa

mid la mid ah USCIS Foomka codsiga I-765 (*Application for Employment Authorization (Codsiga Oggolaanshaha Shaqada)*), ama Foomka I-485 (*Application for Lawful Permanent Residency or to Adjust Status (Codsiga Degenanshaha Joogtada ah ee Sharciga ah ama Heerka In lagu habeeyo)*). Macluumaadka dheeraadka ah, arag [www.ssa.gov/ssnvisa/ebe.html](http://www.ssa.gov/ssnvisa/ebe.html), keliya lagu heli karo Ingiriisi).

- Haddii sharci ahaan aad joogto Maraykanka oo heerkaaga fiisaha uu oggolaado inaad shaqayso, waa inaad la xidhiidhaa (Amniga Sooshalka maxaliga ah (Social Security)) xafiiska la codsanayo.

## Maxaan u baahanahay inaan u soo gudbiyo Social Security (Amniga Sooshalka) xafiiska?

### **Waxaad ubaahan tahay inaad cadayso aqoonsigaaga iyo heerka socdaalka shaqada la oggolaaday.**

Si aadu caddayso aqoonsigaaga iyo heerka socdaalka shaqada la oggolaaday, tus dhokumentigaaga socdaalka Maraykanka ee hadda iyo baasaboorkaaga ajnabiga ah ee aan dhicin. Dhokumentiyada socdaalka la aqbali waxaa ka mid kaaga:

- Foomka I-551 (*Lawful Permanent Resident Card, Machine-Readable Immigrant Visa (Kaadhka Degenanshaha Joogtada ah, Fiisaha Muhaajirka Mishiinku Akhriyi karo)*).
- Foomka I-94 (*Arrival/Departure Record(Diiwaanka Imaanshaha/Bixida)*).
- Foomka I-766 (*Employment Authorization Document/EAD (Dhokumentiga Oggolaanshaha Shaqada/EAD)*).
- Gudbinta shaambada muujinaysa oggolaanshaha fasalka oggolaanaysa shaqada.

**Is dhaafsiga booqdayaasha:** Haddii aad tahay J-1 or J-2 is dhaafsiga booqdayaasha, waxaanu sidoo kale u baahanay inaan aragno DS-2019, *Certificate of Eligibility for Exchange Visitor Status (Shahaadada U qalmida ee Heerka Is dhaafsiga Booqdayaasha) or EAD*. Haddii aad tahay J-1 arday, arday tababar shaqo ku jira, ama booqde caalami ah, waa inaad bixisaa warqadda ka timid kafiilkaaga. Warqaddu waa inay lahaataa cinwaanka kafiilka oo wadata saxeeba asalka ah ee oggolaanaya shaqadaada.

**Ardayga caalamiga ah:** Haddii aad tahay F-1 ama M-1 arday, waxaan u baahanahay inaan aragno Foomkaaga I-20, *Certificate of Eligibility for Nonimmigrant Student Status or Designated School Official (Shahaadada U qalmida Muhaajiriinta Heerka Ardayga ama Sarkaalka Dugsiga Loo magacabay) (DSO, Xarfaha soo gaabsan oo Ingiriisi ah) warqadda*. Macluumaadka dhokumentiyad akale ee ardaydu ay tahay inay bixiyaan, akhri *International Students and Social Security Numbers* (Publication No. 05-10181), (Ardayda Caalamiga ah iyo Lambarada Amniga Soo shalka (Social Security) (Lambarka daabacaada. 05-10181) keliya lagu heli karo Ingiriisi.

### **Waxaad u baahan tahay inaad caddayso da'daada.**

Waa inaad u soo bandhigtaa shahadadaada dhalashada ajnabiga ah haddii aad hayso ama waxaad ku soo heli kartaa 10 maalmood oo shaqo. Haddii kale, waxaanu ka fekeri karnaa dhokumentiyada kale, sida baasaboorkaaga aan dhicin ama dhokumentiga ay soo saartay DHS, ama caddaynta da'daada.

### **Waxaad u baahan tahay inaad buuxiso codsiga.**

Waxaad u baahan doontaa inaad dhammaystirto *Application for a Social Security Card* (Form SS-5) (*Codsiga Kaadhka Social Security (Amniga Sooshalka)*) (keliya lagu heli karo Ingiriisi).

**Muhiim:** Dhammaan dhokumentiyada waa inay ahaadaan miduun kuwa asalka ah ama koobiyada ay xaqiijiyeen wakaalada bixisay. Ma aqbali karno koobiyada sawirka ah ama koobiyada dhokumentiyada nootaayada. Sidoo kale ma aqbali karno risiidhka muujinaya inaad codsaday dhokumentiga.

Waxaan isticmaali karnaa hal dhokumentii ilaa labba ujeedo. Tusaale ahaan, waxaan isticmaali karnaa DHS EAD caddayn ahaan labbadaba aqoonsigaaga iyo sharcigaaga socdaalka shaqada oggolaanaya. Shahaadadaada dhalashada ama baasaboorka waxa uu noqon karaa caddaynta da'da. **Si kastaba ha ahaayee, waa inaad bixisaa ugu yaraan labba dhokumentiyada gooni ah.**

### **Goormaan codosanayaa?**

Haddii aanad codsan karin isticmaalka foomamka sare lagu sheegay, waxaanu ku talinaynaa inaad sugto 10 maalmood ka dib imaanshaha Maraykanka si aad u codsato SSN. Tani waxay noo fududayn doontaa inaanu xaqiijino DHS dhokumentiyadaada onlaynk aah. Tani waxay dedejin doontaa codsigaaga SSN.

Boosta ayaanu ku soo diri doonaa kaadhkaaga SSN sida ugu dhakhsaha badan ee aanu dhamaan ku hayno macluumaadka oo aanu ku xaqiijinay dhokumentiyadaada xafiiska soo saaraya.

### **Imisa ayay codsashada kaadhka SSN kharashkeedu yahay?**

Codsashada SSN oo kaadhkuna waa bilaash.

## Bal ka waran haddii aan u baahdo SSN wixii ah sababaha aan ahayn shaqada?

Waxa dhici karta inaanay kuu oggolaan DHS inaad ka shaqayso gudaha Maraykanka. Haddii ay sidaas jirto, waxaad heli kartaa SSN keliya haddii aad caddayn karto inaad ubaahan tahay sababta aan shaqada ahayn oo ansax ah.

**Dheefaha ama adeegyada dowladda:** Haddii aanad haysan oggolaanshaha inaad shaqayso, waxaad codsan kartaa SSN keliya haddii mid ka mid ah kuwas soo socdaa uu habboon yahay:

- Sharciga federaalka ah ee kaaga baahan adiga inaad bixiso SSN kaaga si aad u hesho dheef ama adeeg gaar ah.
- Sharciga gobolka ama maxaliga ah ee u baahan inaad bixiso SSN kaaga si aad u hesho dheefaha guud ee kaalmada ee aad hadda ka hor u qalanto.

Codsadayaasha aan shaqada ahayn ee SSN waxaa looga baahan yahay inay bixiyaan caddaynta aqoonsiga iyo dhokumentiyada da'da. Tusaalooyinka dhokumentiyadu hoos ayay ku qoran yihiin:

### Caddaynta aqoonsiga iyo da'da

- Foomka I-94 (Arrival-Departure Record) (Diiwaanka Imaanshaha-Bixida).
- Foomka I-862 (Notice to Appear) (Ogaysiiska in La yimaado).
- Foomka I-385 (Alien Booking Record) (Diiwaanka diiwaaninta Ajbaniga).
- Office on Trafficking in Persons (Xafiiska Tahriibinta Dadcka) (OTIP, xarfaha soo gaabsan oo Ingiriisi ah) Warqadda Caddaynta.
- Office of Refugee Resettlement (Xafiiska Dib u dejinta Qaxootiga) (ORR, xarfaha soo gaabsan oo Ingiriisi ah) Warqadda Caddaynta.

### Caddaynta aqoonsiga oo keliya

- Foomka I-220A (Order of Release on Recognizance) (Amarka Shaacinta Qirashada).

**FIIRO:** Foomka I-220A (Order of Release on Recognizance) (Amarka Shaacinta Qirashada) ama buuxinayo Social Security (Amniga Sooshalka) shuruudaha inay u adeegto caddaynta da'da.

Haddii aad u baahan tahay SSN si aad u buuxiso shuruudahaaga gobolka ama maxaliga, **ka sakow aqoonsiga iyo da'da dhokumentiga, waa inaad gudbisaa warqadda ka socota wakaalada dowladda.** Waa inay noqotaa warqad leh cinwaanka (maya qaabka warqaddaha ama koobiyada sawirka ah) iyo:

- Gaar ahaan kuu caddaysa sidii codsadaha.
- Gaar ahaan sheegta sababta aanay shaqadu u jirin SSN ayaa loo baahan yahay.
- Soo xigo sharciga kaaga baahan adiga inaad haysato SSN.
- Sheeg inaad buuxiso dhammaan shuruudaha wakaaladaha, laga reebo SSN
- Ka kooban magaca xidhiidhka wakaalada, saxeexa, iyo lambarka telefoonka.

### Ma u baahan tahay ujeedooyinka cashuurta?

Waxaad u baahan kartaa SSN ujeedooyinka cashuurta haddii aan lagu oggolayn inaad ka shaqayso Maraykanka. Waxad ka codsan kartaa *Individual Taxpayer Identification Number* dhanka Internal Revenue Service (Adeega Dakhliga Gudaha) (IRS, xarfaha soo gaabsan oo Ingiriisi ah). Booqo IRS qof ahaan, ama soo wac IRS lambarka wicida bilaashka ah, **1-800-TAXFORM (1-800-829-3676)**, oo codso Foomka W-7, *IRS Individual Taxpayer Identification Number* (Codsiga IRS Lambarka Aqoonsiga Cashuur bixiyaha Gaarka ah).

Ganacsi ama wakaalada dowladda ayaa ku waydiin karta adiga SSN Haddii aan lagu oggolaan inaad ka shaqayso Maraykanka, waydii haddii ay kugu aqoonsan karaa adiga qaab kale. Badanka xaaladaha, waxaad awood u yeelan doontaa inaad hesho adeega ama ruqsada aad u baahan tahay adoon haysan SSN.

### **Haddii lagu qoondeeyay SSN oo aan ahayn ujeedooyinka shabakada, uma isticmaali kartid inaad shaqayso.**

### **Inaad nala soo Xiriirtid**

Waxaa jiro dhoor qaabab aad nagula soo xiriirtid, sida onleenka, taleefon ahaan, iyo qof ahaan. Waxaan halkaan u joognaa inaan kaaga jawaabno su'aalahaaga oo aan kuu adeegno. Wixii ka badan 85 sanno jir, Social Security (Amniga Bulshada) ayaa gacan ka geystay illaalinta maanta iyo bari iyagoo siinayo macaash iyo illaalo dhaqaale malaayiin dad ah oo loo marayo safarka noloshooda.

### **Booqo websaydkeena**

Qaabka ugu haboon ee loo sameeyo ganacsiga Social Security (Amniga Bulshada) waa onleenka ee [www.ssa.gov](http://www.ssa.gov) (waxaa lagu heli karaa af Ingiriis iyo Isbaanish). Waxaad gaari kartaa wax badan. Qaar ka mid ah adeegyadaan waxaa lagu helayaa kaliya af Ingiriis. Si aan kaaga caawino sameynta ganacsiga Social Security (Amniga Bulshada),

- Ka codso Extra Help with Medicare prescription drug plan costs (Caawin Dheeri ah oo qarashaadka qorshaha daawada qorista Medicare) (waxaa lagu helayaa kaliya af Ingiriis).
- Codso noocyada ugu badan ee macaashka (waxaa lagu helayaa kaliya af Ingiriis).
- Hel koobiyada daabacaadaheena (waxaa lagu helayaa luuqado kala duwan).
- Ka hel jawaabo su'aalaha inta badan la isweydiiyo (waxaa lagu helayaa af Ingiriis iyo Isbaanish).

Markii aad abuurtid gaar ah oo *my* Social Security akoon (waxaa lagu helayaa kaliya af Ingiriis), waxaad sameyn kartaa xitaa wax badan.

- Dib u eeg *Social Security Statement* (Bayaankaaga Amniga Bulshada).
- Xaqiiji daqliyadaada.
- Hel qiyaasaha macaashka mustaqbalka.
- Daabac warqada xaqiijinta macaashka.
- Badel warbixintaada dabaajiga tooska ah.
- Codso badelka Medicare (Daryeelka-caafimaadka) kaarka.
- Hel badelka SSA-1099/1042S.
- Codso badelka Social Security (Amniga Bulshada) kaarka, haddii aadan qabin wax badelo ah oo gobolkaaga ka qeybqaato.

Gelitaanka akoonkaaga gaarka ah *my* Social Security waxaa laga yaabaa inuu ka xadidanyahay isticmaalayaasha ka baxsan Mareykanka.

### **Na soo wac**

Haddii aadan isticmaali karin adeegyadeenna onleenka, waan kugu caawin karnaa taleefon ahaan markii aad soo wacdid xafiiska deegaankaaga ee Social Security (Amniga Bulshada) ama Lambarka Taleefonkeena bilaashka ee Qaranka 800. Waxaan bixinaa adeegyada turjubaanka oo bilaash ah markii la codsado. Waxaad ku heli kartaa warbixinta xafiiska deegaankaaga adigoo gelinayo furaha ZIP-kaaga websaydkeena raadiyaha xafiiska (inkastoo raadiyaha xafiiska deegaanka kaliya lagu helayo af Ingiriis, waad gelin kartaa furaha zip-kaaga si aad u heshid xafiiska deegaanka kuu dhow).

Waxaad naga soo wici kartaa **1-800-772-1213** — ama lambarkeena TTY ee, **1-800-325-0778**, haddi aad dhagool tahay ama uu kugu adagyahay maqalka — inta u dhaxeeyso 8:00 a.m. – 7:00 p.m., Isniinta illaa Jimcaha.  
**Waqtiyada sugitaanka ee lala hadlo wakiilka Social Security (Amniga Bulshada) ayaa**



**caadi ahaan ka gaaban Arbacooyinka illaa Jimcooyinka ama xili dambe maalinta.** Wixii adeegyada turjumaada bilaashka ah, ku jir qadka oo aamusnow inta lagu jiro cajalada tooska ah ee codka af Ingiriiska, illaa wakiilka Social Security (Amniga Bulshada) ka jawaabo. Wakiilka Social Security Amniga Bulshada) ayaa la xiriirayo turjubaan kaa caawiyo wacitaankaaga.

Waxaan sidoo kale ku bixinaa adeegyo badan oo taleefonka tooska ah af Ingiriis iyo Isbaanish, oo la helo 24 saac maalinkii, marka uma baahnid inaad la hadashid wakiilka Social Security (Amniga Bulshada).

Haddii aad haysatid dokumentiyo aan u baahannahay inaan aragno, xasuuso inay orijinaal ahaadaan ama koobiyo ay cadeeyeen hay'ada soo saartay.



Securing today  
and tomorrow

**Social Security Administration**  
Publication No. 05-10096-SO | April 2023 (Recycle prior editions)  
Social Security (Amniga Sooshalka) Lambarada kuwa aan Muwaadiniinta ahayn  
Social Security Numbers for Noncitizens (Somali)  
Produced and published at U.S. taxpayer expense  
Uu soo saaray oo uu daabacay kharash cashuur bixiyaha Maraykanka